**Patientinformation**

(Till dig som ska göra abort med den kirurgiska metoden)

# Warboixin ku socota qofkaagaan sameeynaya ilmo iska soo riddida/xaaqida qaabka qalniinka ah

## Sidee ayuu u dhacayaa ilmo sooxaaqida/ridida qaabka qalniinka ahi?

Xaaqitaanka ilmaha/uurjiifta la soo xaaqayo waxaa la sameeynkaraa inta u dhaxaysa uurku marka uu yahay todobo toddobaad ilaa iyo toban iyo labo toddobaad. 7+0-12+0. Uurkujirtu/ ilmahu inta uu le, eg yahay waxaa la Xaqiijinayaa booqasha ka horeeyso inta aan ilmaha la soo xaaqin. Si ilmo soo xaaqidu inoogu fusho si amni iyo dhibla´ aan ah iyo sida ugu macquulsan, Waxaa lagu siin doonaa kaniini loo yaqaano ”cytotec” kaasoo jilcinaaya makaanka/ilmogaleenka, daawadaas oo sababeeyso ilmaha/Uurkujirtu in ay soo baxdo/ dhacdo.

**2, Xabbo oo kaniini/sunboosto ah ayaa saxaaxa/xubinta taranka la galinayaa 3,** saddex saacadod ka hor inta aan ilmaha la soo riddin/xaaqin. Marka aad qaadato/gashato daawadaas ayaa uu ilmo sooridkii kuu bilaabmayaa. Waxaa aad dareemi kartaa xanuun sidii caadadii oo kale ah. Waxa aana dhici karta in uu dhiig yimaado.    Si looga hortago xanuunka waxa aad cuneysaa kaniini xanuun baabi´ iye ah 3 **xabbo oo panodil a 500 mg**. (Paracetamol) ah.

Marka aad timaado qeybta qalniinka waxaa ku caawinayso kaalkaaliso qaabilsan qeybta suuxinta. Irbbad ayaa gacanta lagaa gelinayaa dabadeed daawo ayaa lagaa siinayaa/ shubayaa irbbada gacanta lagaa geliyey. Kadibna si dhakhso ah ayeey jidhkaaga u galeeysaa waadna seexaneeysaa.

Marka aad seexato/ suuxdo qalab ayaa lagalinayaa makaanka dhuuntiisa taas oo lagu soo nuugayo/dhuuqayo wixii ku haray makaanka. Qalniinka soo xaaqitaanka ah wuxuu qaadanayaa dhawr daqiiqadood oo kaliya.

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN
NU-SJUKVÅRDEN

## Maalinka soo Xaaqitaanka/ riditaanka ilmaha. ”Abortdagen”

Waxa aad iska diiwaangelineysaa qaybta soodhawenta ee ku yaal iridka laga soo galo ee isbitaalka. Kadibna waxa aad u siigudbaysaa qeybta qalniinka. Marka aad qeybtaas timaado, halkaas waxa aad bedelaneysaa dharka oo aad gashaneysaa shaadhka/shaatiga qalniinka. Waxaa kale oo aad la kulmeeysaa dhakhtarka qaabilsan suuxinta iyo dhaqtarka ilma sooxaaqida. Xaaqitaanku waxa uu qaadanayaa dhowr daqiiqadood oo kaliya, oo waxa aad soo kacaysaa iyada oo markaas la dhameeyey xaaqidii. Kadibna sariirta ayaa lagugu kaxaynayaa/qaadayaa waxaana lagu geynayaa qayb kale ilaa aad si fiican u soo wada toosto. Fiiri! Warbixinta ku qoran warqada lagaasiiyey booqashadii hore ee aad qeybta maalmeedka horay ugu timid**. Isbitaalka** waxa aad ka bixi kartaa marka aad dareento in aad si fiican u toostay. Baabuur ma wadi kartid maalinkaan maxaa yeelay daawada suuxinta ayaa jidhkaga ku jiridoonta qiyaastii 24 saacadood kadib markii lagu suuxiyey, kafal celintaada khatartuna waa ay yartahay ama waa daciif. Sidaas daraadeed Waxaa wanaagsan in qof qaraabo ahi ku kaxeeyo qalniinka ka dib.

Spiral iyo P-stav waa noocyo ka mid ah dawooyinak ka hortagga uurka waxaana lagu gelinkaraa soo Xaaqitaanka kadib hadii aad u baahantahay. Hadii aad doorato kaniiniga ka hortagga uurkana waxaa bilaabikartaa maalinta soo Xaaqitaanka habeenkeeda ama ugudanbayn subixii maalinta xigta. Waxa aad u baahantahay inaad jirro qorato/ fasax ahaato maalinka qalniinka/ xaaqitaanka, kadibse wax fasax ah uma baahnid.

## Soo xaaqida/ ridditaanka ka dib

Dhiig ayaa kaa imandoona qalniinka soo xaaqitaanka kadib, ugu badnaan ilaa 7-10 maalmood ayuuna dhiigu kaa socon doonaa. Dhiigu badanaa waa uu yaryahay laakin tariib tartiib ayuu u dhamaandoonaa. Badanaa xanuun lama dareemo. Laakin hadii uu xanuun ku qabto waxa aad qaadan kartaa xanuun baabi, iye Ipren/Ibumetin ama Alvedon. Ilaa iyo inta uu dhiigu kaa socdo waxa aad iska ilaalineeysaa inaad wax galiso cawradaada/hoosta si aadan infektion u qaadin. Sidaa daraadeed ha isticmaalin olweeysta/ tampong ee cawrada/hoosta la galiyo, iska ilaali galmada iyo dabaasha. Dhiiga caadadu waxa uu kuu soo noqonayaa caadi ahaan 3 ilaa 6 toddobaad kadib, waxaana dhici karta marka hore in uu ka badanyahay dhiigii caada ahaa ee hore kuugu dhicijrey.

## Caadi ahaan ma dhacdo in dhibaatooyin caafimaad kaa soo gaaaraan xaaqitaanka/ilma sooridka, laakin waa muhiim in aad ogaato waxa dhici kara

- Waxaa dhici karto in aad infekshin qaadid kadib. Xanuun cusub, qandho/xummad ama dhiiga oo kugu soo kordhaa waxa eey u noqon kartaa calaamad infekshin in aad qaaday. Sidaa daraadeed waxa aad u baahantahay daawo antibiotika ah.

- Mararka qarkood waxa dhaca in lagu guuldaraysto soo xaaqitaanka uurka marka ugu horeysa. Intaa kadib waa lagu kontoroolayaa oo waxaa la baarayaa in aad wali uur leedahay 4 ilaa 3 toddobaad kadib soo riditaanka/ xaaqitaanka uurjiifta.Eeg qoraalka hoose!

**Hadii ay kula soo gudboonaato arin ku saabsan Warbixinta sare. – la soo xidhiidh tala bixinta.**

## La socosho xaaladaada ama soo noqosho

Waa muhiim in la hubiyo in lagu guuleeystay ilmo soo ridida/ xaaqida. 3/Sadex ilaa 4/afar toddobaad kadib waa khaasab in aad sameeyso baaritaanka uurka, hadii baaritaanka uur sheego nala soo xidhiidh oo noo soo sheeg jawaabta. Waxaa lagugu yeedhayaa in aad ku soo noqoto ummulisada/kalkaalisada kadibna waxaad si wada jirah markaa u sameeyn kartaa baaritaan uur. Soo noqoshada danbe waxaa la eegayaa xaaladaada caafimaad in eey wanaagsantahay soo xaaqitaanka/riditaanka kadib. Hadii aad ku qasbanaatay in aad nala soo xidhiidho xanuun, qandho/xummad ama dhiig kugu soo kordhay awgeed, waxaa loo baahanyahay in xitaa baaritaan xanuunka haweenka ah lagugu sameeyo. Ma aha go´ aan fudud ilmo la iska soorido. Waxaa kugu soo dhacayaa su´aalo badan oodan horey isku weeydiinin. Hadaad dooneeyso fakarkaada in aad qof la wadaagto maalinkaas, haka labalabeyn in aad soo wacdo.

| **(Besök)** | **(dat)** | **(tid)** |
| --- | --- | --- |
| Booqashada 1 | Taariqda ______ | saacada______ |
| Booqashada 2 | Taariqda ______ | saacada______ |

**(2 tabletter Cytotec + 3 tabletter Panodil ska Du ta kl.)**

2xabo kaniiniga Cytotec iyo 3 kaniini Panodil ayaad

qaadaneeysaa saacada______________________________

**Gynekologmottagningen**
**Telefon 010-435 22 00**
Måndag – torsdag kl. 08.00 – 16.00
Fredag kl. 08.00 – 15.00

**NÄL, Avdelning 35**
**Telefon 010-435 03 50**
Övriga tider

**(Kontakt barnmorska)** La xiriir umulisada ___________________________